


Ducooyinkii la aqbalay.

## **Ducooyinkii la aqbalay**

WQ:

Ismaaciil Haniye.

Ducooyinkii la aqbalay.



Ducooyinkii la aqbalay.

## Xuquuqda Buugga :

Buuggan waa u fasax qof kastaa inuu daabacdo , siina faafiyo ,waxa se aan la oglayn :

-In dadka laga iibiyo.

-In magaca qoraagga la badalo oo magac kale lagu ismo.

Ducooyinkii la aqbalay.



Ducooyinkii la aqbalay.

### Hibeyn :

Buuggan waxan u hibeynayaa shakhsii igu qaaliya , oo noloshayda horomarkeeda qayb weyn ka qaatay , waa shakhsigii igu soo tabcay , barbaarintayda iyo waxbarashadaydana tuurta u soo ritay , waa shakhsigii igu soo barbaariyey Diinta, Salaadda iyo Iimaanka. Shakhsigaasu waa Adeerkay Chief caaqil Cali Ibraahim Aw-Diirye . Adeer waxan kuu hibeynayaa xasaanadka buuggan oo dhan , Allena waxan kaaga baryaya inuu

“ Caqliga , cimriga , cafimaadka , cududa kuu  
barakeeyo . Ammiin .. Ammiin.”

Ducooyinkii la aqbalay.

Erayo La Soo Gaabiyay

AHUN: Alle ha u naxariisto.

NNKH: Nabadgelyo Iyo Naxariis Korkiisa Ha Aahaato.

RC: Radiyallaahu Canhu/Canhum.

CS: Calayhi/Calayhim Salaam.

FG : Fiiro gaara.

Ducooyinkii la aqbalay.

## Erayga Qoraaga

"Ninkii Tiin abuuriyo

Ninkii Timir tallaalaba

Taariikhdu waa warin"

-Cabduqlaadhir-Yamyam.

Eebbe ayaa mahad oo dhan iska leh. Eebbaha i abuuray, i kobciyey, i barbaariyay, igu galladay maanka fayow ee aan ku caabudo , dadkaygana aan maaxdiisa ku anfacayo Naxariis, nabadgallyo, maamuus iyo milgo ay sharafi ku dheehan tahay korkiisa ha ahaato, xabiibkii qalbiga iyo ruuxda; Muxammed "NNKH".

"Yaa ka wanaag badan, Daaha yaasiinoow

Yaa kuu ekeen kara, yaase kula simanoow

Yaabkii yimaaddaba, kaannu raacaynoow

Sallala Calayk suubanoow Nabiyoow" <sup>1</sup>.

---

<sup>1</sup> Qasiido Nabi Ammaan ah.

## Ducooyinkii la aqbalay.

Ducadu waa cibaado , waana laf-dhabarta cibaadada , waa astaan muujinaysa in aad u baahan tahay mawlahaa awoodda badan , ducada waa lagu baahi baxaa , Allena wuxu yidhi : "I barya waan idinka aqbalin'e" .

Maanta waxaynu joognaa duni isu furantay, mashaakilkeeduna batay kolkii baahidii qofka iyo taagtiiisi kala badatay , taas oo keentay xanuun nafsiya sida murugada , warwarka , walbahaarka , walaahow, dhibtaa jirta maanta waxan kaga bixi karnaa baryada Alle.

Maanta waxaynu joognaa duni gaalo hogaanka maamul iyo aqooneed , sidoo kale dhaqaaleed iyo siyaasadeed ay gacanta ku hayso , taas oo keentay in diintii laga xuubsiibto , si diinteenaya aynu ugu sugnaano waxa inna sugaya waa baryada Alle .



اللهم يا مقلب القلوب ثبت قلوبنا على دينك

Buuggan yarahan kooban waxan ku soo bandhigi doonaa muhiimadda baryada Alle leedahay , Adaabta ducada, Sababaha ducada lagu aqbalo , xilliyada ducada la aqbalo , qaar kamida qisooyikii dadkii ducada laga aqbalay , iyo waxyaabo kale oo muhiima.

## Ducooyinkii la aqbalay.

Dhambaalka buuggu waa in aan isku dhiirigalino in aan mar walba Alle barino , baahideenan u sheegano , qalbigana ka yaqiinsano inuu inaga aqbalayo, waayo Alle waa deeqlii ka xishooda gacmo kor loogu taagay inay madhnaan ku noqdaan .

Waxaynu ku jirnaa bishii Ramadaan , dadku waa wada sooman yahay , waxaana xusid mudan in qofku markuu sooman yahay ducada laga aqbalo, si kolkaa ducada laynooga aqbalo waa in aan u dhugmo yeelanaa aqoonta ducada. Buuggan waa hadyad aan u hadyeeynayo qof kasta oo soomaali ah , bisha barakaysan ee Ramadaan awgeed , waxaanan rabaa badal ah inuu ii duceeyo, oo aanu naga ilaabin ducadiisa wanaagsan.

*Dulqaadna Allaad u tahay ,*

*Baryana deeqlaad u tahay ,*

*Adaan talo kaa dagdadin ,*

*Dorraato wax kuu e kaa ,*

*Adaan dib u qoomamayn<sup>2</sup>.*

---

2 :Abwaan Hadraawi Alle ha xafidee.

Ducooyinkii la aqbalay.

AFEEF

"Nin Raggi eraygiisna  
Astaan buu u dhigtaaye  
Rabbow eex ma tiraabine  
Aqoon haygu cadaabin"

-Maxamed-Gaarriye

Maahmaah Soomaaliyed baa tidhaahda: "*Aqalkaaga hortiisana Ood weyn baa la dhigtaa, odhaahdaada horteedana afeefbaa la dhigtaa*". Waxa aan ka cudurdaaranayaa wixii khalad ah ee buuggan ku dhex jira, kolley gafku waa mid ku lammaan qof kasta e; oo waa tii hore loo yidhi: "*Nimay hooyo dhashay, hal ma seegi waydo*".

Wixii khalad ah ee buuggan lagu arko, waxa la iigu soo hagaajin karaa:

Email: [Foolaad202@gmail.com](mailto:Foolaad202@gmail.com).

Facebook: [Ismaaciil Haniye](#).

Watspka: [0633440058](tel:0633440058).

Ducooyinkii la aqbalay.

## Maxaynu u ducaysanaynaa ?.

*Ducadu waa cibaado.*

Waxay u ducaysanayaa:

-  Waayo ducadu waa cibaado .
-  Waayo ku ducaysta Ilaahey ayaa jecel .
-  Waayo cid aan Alle ahayn baahideena ma dabooli karto.
-  Waayo ducadu waa xaqiiqada cibaadada.
-  Waayo ducadu waa laf-dhabarta cibaadada.
-  Waayo ducadu waa shayga kaliya ee celiya qadarka.
-  Waayo ducada waxa lagu helaa liibaanta adduunyo.
-  Waayo ducadu waa tawxiidkii oo aad xaqiijinaysid.
-  Waayo Alle ayaa jecel in la baryo .
-  Waayo ducadu waa balo xijaab.
-  Ducadu waa sabab kamida sababaha wanaagg u soo jiida qofka , dhibtana ka celiya

Ducooyinkii la aqbalay.

## Shuruuda ducada

Ducadu waxay leedahay shuruudo laga rabo qofka ducaysanaya inuu la yimaado, :-

- 1 inuu Alle u badhax tiro ducada , cidna aanu la baryin. Nabiguna (N.N.K.H.) wuxu yidhi:**"Haddii aad cid baryayso Alle bari"**
- 2 Inuu u ducaysto sida ku sugar sunnada Rasuulka (CS).
- 3 Inuu Qalbigiisa soo jeediyo, oo aanu noqon maqane jooga, oo khushuuc la yimaado.
- 4 inuu si dhaba Alle wax u weydiisto , kana go'naato ducadu.
- 5 inuu ku kalsoonaado inuu Alle ducada ka aqbalayo, siduu Nebigu (N.N.K.H.) yidhi : **"Alle barya idinkoo yaqiinsan inuu ducada idin ka aqbali doono<sup>3</sup>".**
- 6 In hugiisa iyo dhuunigiisuba ahaadaan xalaal.



3 : Xadiiskan waxa wariyey Imaamu Tirmidi.

Ducooyinkii la aqbalay.

## Sababaha ducada lagu aqbalo

Sunnada Rasuulkeena (Cs) waxa ku soo arooray waxyabo sababa in qofka ducada laga aqbalo , waxaanan ka xusi karnaa:

1. Ikhlaaska : oo ah in aanu cidna Alle la baryin.
2. Inuu ka dhix boxo dambiyada.
3. Cunidda xalaasha : oo ah inuu qof xalaal cuna noqdo.
4. Sama-falka waalidka : waa sababaha ducada lagu aqbalo.
5. Xidhiidhinta qaraabada.
6. Inuu Alle ku baryo magacyadiisa wanaagsan.
7. In qofku Alle baryo xilliyada si gaara ducada loo aqbalo oo aan sheegi doono .
8. Inuu Alle ka malaysto male wanaagsan.

Sabahan aan kor ku soo wada xusnay dhammaantood waxay ku sugnaadeen Sunnada Rasuulka ( N.N.K.H.) ,



Ducooyinkii la aqbalay.

## Duco aqbalka


*Ilaahay baryada wuu aqbalaa*

Alle (S.W.T.) waa deeqli , qof gacmaa kor ugu taagay oo baryeyna faro madhnaan kuma celiyo. Walaalaha qaar ayaa is weydiin kara in badan ayaan Alle arrin ka baryey walina la iima aqbalin oo arrintii aan ku ducaystay ma helin? Ee waayo ? .Waxa muhiima inuu qofku ogaado in duca kasta oo qofku ducaysto saddex miduun u dhacdo , ama loogu badalo :

1 In laga aqbalo , wuxu doonayeyna la siyo.

2 In dhibaato ku soo socotay lagaga xijaabo

3 In Aakhiro iyadoo khayr badan loogu dib dhigo



Ducooyinkii la aqbalay.

Alle maxaan weydiistaa?

Alle weydiiso wax kasta oo aad u baahan tahay , baahi kaliya maahee wax walboo khayr kuu leh if iyo aakhiro. Nebigu ( N.N.K.H.) wuxu mar walba ku ducaysan jiray :

**اللهم إني أسألك العفو والعافية في الدنيا والأخرة**

"Allow waxan ku weydiista cafis iyo cafimaad adduunyo iyo aakhriba".



Waxa kaloo muhiima inuu qofku Alle weydiisto waxyaabaha waaweyn , sida Jannada firdawsaa , sidoo kale adduunyada wax walba halka ugu saraysa Alle uu ka baryo.



## Ducooyinkii la aqbalay.

Qiso

### UWEYS AL-QARNI

*Tabicigii Rasuulku (Cs) sii sheegay in ducada laga aqbalo..*

U wayska Al-Qarni wuxu ahaa nin taabiciya oo ku noolaa wadanka Yamen , waxa uu ahaa nin hooyadii u baarri ah, waxa uuna sama-falkii hooyadii ku helay inuu noqdo qof ducada laga aqblo . Sama-falka hooyadii ayaana ka joojisay inuu Rasuulka ( Cs) u yimaado . Uways waxa ku dhacay xanuunka baraska , ka dibna ilaahay ayuu baryey : " Allow xanuunka iga kor qaad " Allena waa uu ka aqbalay , waanu ka bogsaday baraskii, in dirham la saaro oo qudha ayaa ku hadhay.

Rasuulku (Cs) Cumar binu Khadaab ayuu kula sii dardaarmay inuu ka ducaysto uways , haddii uu la kulmo kana dalbado inuu Alle dambi dhaaf u weydiyo, halkaana wuxu ku gaadhay sama-falkii hooyadii . Uways wuxu ahaa nin saalixa , dadkana aan laga dhex aqoon , kolkii la ogaadayna magaalada kuufa oo uu deganaa ayuu dhinac uga baxay dibna looma arag.

Dulucda qisada : Qofkii raba liibaan adduunyo iyo mid aakhiro , ducadiisa oo kacda , ha u sama falo waalidkii

Ducooyinkii la aqbalay.

## Adaabta Ducada

Akhirstaha sharafta badanow , haddii aad qof madaxa wax weydiisanayso , sidee ayaad wax u weydiisan lahyd?

Waxa hubaala in aad isasii diyaarin lahayd , siina diyaarsan lahayd hadalo ammaan iyo murti isagu jira , si qofka aad wax weydiisanaysaa kuugu nuglaado. Ilaahey ayaa tusaalaha sare leh'e , sidee ayaad Alle markaad wax weydiisnayso u weydiisanaysaa ?. Akhriste kolkaad ducaysanayso waxa laga rabaa adaab aad Alle wax u weydiisanaysid , waana sidan :-

1.Ku bilow mahad-naqa iyo ammaanta Alle, kuna ammaan magacyadiisa wanaagsan , kuna xeel-dheerow ammaantiisa aan dhammaadka lahayn.

2.Ku salli xabiibkaagii Muxamed ( N.N.K.H.).

Qiso

Rasuulka ( Cs) ayaa arkay nin ducaysanaya oo ducadiisii ku bilaabay mahad-naqa Alle iyo salliga Nebiga , wuxu ku yidhi :"Ka ducayanayoow bari waa lagaa aqbaline , weydiisana waa lagu siin'e."



Ducooyinkii la aqbalay.

3.U jeeso qiblada.

4.kor haw qaadin codkaaga , waayo Alle waa mid mar walba ku maqlaya.

5.Qiro dambigaaga , sidoo kale qir galladda Alle ku siiyey.

6.Ooy , haddii aanad ooyi karina iska oohi.

7.Ducadii walba saddex mar ku celi.

8.kor u taag gacmahaaga , madaxana hoos u dhig.

9.soo weysayso intaanad ducaysan.

10 . ku celceli weedhan : ياذالجلال ولاكرام :

11.ku bilow ducada naftaada , ka dib waalidkaa , ka dib dadka muslimiinta ah , hana ilaabin akhriste in aad u ducaysid walaaha muslimiinta ah ee daafaha dunida ku dhiban , kuwa gaaladu haysto , kuwa jeelasha daalimiinta ku xidhan , kuwa duruufaysan , kuwa xanuunsanaya.

12.Ku so af-meer ducadaada sidan :

سبحان رب العزة عما يصفون

وسلم على المرسلين والحمد لله رب العالمين

Ducooyinkii la aqbalay.

## Saddex duco badso kolkaad sujuudsan tahay

Akhirstaha sharafta badanow, qofku in ducada laga aqbalo wuxu ugu dhaw yahay kolkuu sujuudsan yahay, sida uu Xabiibkeenii Muxamed (Cs) yidhi. Haddaba akhriste waligaa saddexdan duco ha ilaabin markaad sujuudsan tahay :-

اللهم إني أسألك حسن الخاتمة

Ilaahow waxan ku weydiistay khaatumo wanaasan.

اللهم ارزقني توبة نصوحة قبل الموت .

Ilaahow igu arsaaq toobad wanaagsan geerid ka hor.

يا مقلب القلوب ثبت قلبي على دينك

Allaha qaluubta gedgediyoow , ku sug qalbigeyga  
diintaada.



## Ducooyinkii la aqbalay.

Qiso

### Maxaa ducada nalooga aqbali waayey ?

Ibraahim ibnu Adham waxa uu ahaa nin cibaado badan oo saalixa , dunidan safarka laga yahayna ka saahiday, waxaanu ahaa mid mar walba dadka fara samaha kana reeba xumaanta.

**Maalin maalmaha kamida ayaa isagoo dhex maraya suuqa magaalada Basra ayaa la weydiiyey : Ibraahimaw Alle waan barinayaaye maxaa ducada na looga aqbali waayey ?.**

Wuxuu ugu jawaabay "Reer basraw qalbigiina toban shay baa dishey ",Iyagoo dhagaa u raaricinaya ayey yidhaahdeen: "Oo waa maxay tobanka shay? " .

Waxa uu yidhi :-

1. Alle ayaad barateen , xaqiisiina ma gudataan .
- 2.Quraa'nka ayaad barateen,kumana camal fashaan
3. Waxad sheegateen inaad Rasuulka jeceshihiin , sunnadiisana waad ka tagteen .
4. Waxad sheegateen inaad shaydaanka col la tiihin , waadna raacdaan.

**Ducooyinkii la aqbalay.**

5. Waxad sheegateen inaad Janada jeceshihiin, umana camal falataan .
6. Waxad sheegateen inaad jeceshihiin ka badbaadidda cadaabta , naftiinana waad ku ridaysaan .
7. Waxad tidhaahdaan Mawdku waa Xaq , umana Diyaar garowdaan .
8. Waxad ku mashquusheen Ceebtii dadka kale , tiiniina waad ilawdeen.
9. Waxad aastaan dadka dhintey , kumana waano qaadataan.
10. Waxad cuntaan nimcada Alle , kumana shukridaan.



**Xilliyo ducada la aqbalo**

## Ducooyinkii la aqbalay.

Xilliyada si gaara ducada loo aqbalo waxa kamida :-

### Habeenka laylatul qadriga

Habeenka laylatul qadrigu waa habeenka sannadka ugu khayrka badan, cibaadada la cibaadaystaana waxay ka khayr badan tahay kun bilood oo cibaado ah. Habeenkan waxa soo daga malaa'igta oo Jibriil hoggaaminayo. Suubaneheennii sharafta badna waxa uu inagu dardaarmay in aynu ducaysano , kuna ducaysano ducadan :



اللهم إنك عفو تحب العفو فاعف عنـي.

### Salaadaha ka dib

Xilligana waa xiliyada ducada la aqbalo , waxaana sugay axaadiis Nebiga N.N.K.H laga soo wariyey.

Salaadaha aynu sheegaynaa waa salaadaha faralka ah , waxaana Abii Umaama Nebiga ( N.N.K.H.) weydiiyey : goormaa ducada la aqbalaa ? wuxu yidhi “ Ducada habeenka xilliga dambe iyo salaadaha ka dib).



Ducooyinkii la aqbalay.

( *xadiiskan waxa wariyey Tirmid*).

**Adaanka iyo aqiimka dhexdooda**

xilliyada si gaara ducada loo aqbalo waxa kamida xilliga kooban ee u dhexeeya adaanka iyo aqiimka . Anis binu Maalik ( Rc) waxa uu Nebiga ( N.N.K.H.) ka wariyey inuu yidhi : “ Adaanka iyo aqiimka dhexdooda ducada lama celiyo”. ( *Xadiiskan waxa wariyey imaamu Tirmidi*).

**Markuu Diiggu ciyo.**

Diiggu waa noole arka malaa'igta , waxaana ka sugnaatay xabiibkeena (Cs) inuu yidhi: markuu Diigguu ciyo Alle fadligiisa weydiista. *Macnaa ducada waa la idinka aqbalin*



**Ducada Waalidka**

Ducada waalidku u duceeyo caruurtiisa waa maqbuula , Rasuulku ( SCw) waxa uu yiri saddex duco shaki kuma jiro in la aqbalayo waa 1. *ducada waalidka* 2.



*Ducada Qofka sooman iyo 3. Ducada qofka Musaafirka ah ( Safarka)*

**Ducooyinkii la aqbalay.**

**Ducada Sujuudda**

Ruuxu Alle wuxu ugu  
dhaw yahay marku  
dhulka u dhigo xubintiisa ugu  
qaalisan; wajiga . Rasuulku waxa uu  
yiri : “Qofku waxa uu Allah ugu  
dhow yahay xilliga uu Sujudsab  
yahay ee Allah Xilligaas wax  
weydiista.



**Marka uu qofku sii seexanayo  
iyo marka uu soo tooso**

Xilliyada si gaara ducada loo aqblo  
waxa kamida labadaa xilli ee aan xusnay , waxaana qofka la  
gudboon inuu ka faa'ideysto. Nebiguna ( Cs ) aad buu u ducaysan  
jiray.



**Goobaha ducada lagu aqbalo.**

## Ducooyinkii la aqbalay.

1.Goobaha Xajka ee barakaysan ,  
sida carafe , mina , mustalifa IWM.



2.Masaajidada : waa goobaha ugu muhiimsan ee ducada lagu aqbalo , masaajidadaa waxa ugu mudan masjidka Nebiga ,Masjidka xaramka , masjidka Al-aqsaa. Meel kasta Alle ducada wuu ku aqblaa , waxaase ugu mudan masaajidada .



## Ducooyinkii la aqbalay.

Sunnada Nebigeena suuban (N.N.K.H.) waxa ku xusan dad si gaara ducada looga aqbalo , dadkaas waxa kamida :-



**Madluunka :** oo ah qofka dulmi lagu sameeyey.



Dulmigu waa falka ugu foosha xun , Allena ugu neceb yahay , sidaas darteed qofka la dulmiyo Alle baryadiisa waa aqblaa.



**Musaafirak :** qofka socdaalka ah ducada waa laga aqbalaa , sidaas darteed qofka musaafirka ah waxa la gudboon inuu ducada badsado.



**Qofka walaalkii u duceeya isagoo ka maqan.**



**Ducada Waalidka** uu u duceeyo ilmihiisa. Wuxaan ii muhiima in aan xuso in madaama aan bishii Ramadaan ku jirno aan ka ducaysano waalidkeen.

## Sacaadda maalinta jimce

## Ducooyinkii la aqbalay.

Maalina jimcaa waxa ku jirta saacad ducada la aqbalo , ruuxii haleenana aan ducadiisa la soo celin. Haddaba waa tee saacadaasu?

Culimadu aad bay isugu khilaafsan yihiin sacaadda dhabta ah ee jimcaa kamida ee ducada la aqbalo , waxaase ay u badan yihiin inay ku jirto casarka maalinta jimce ilaa intay libdhadu dhacayso, waxaanay u daliishanaya xadiiskan :



Waxa mudan se in qofku maalintoo dhan ku dadaalo, oo aanu wakhti gaara isku koobin.

**Habeenka laylatul qadriga & Ducada  
la akhirsto .**

## Ducooyinkii la aqbalay.

*"Qofkii Laylatul-Qadriga kaca (yacni habeenkaa cibaado sameeya) isagoo aaminsan, ajar iyo xasanaadna Ilaahey ka dalbanaya waxaa loo dhaafayaa dambigiisii hore." Nabiga (CS).*

Habeenka laylatul qadrigu waa habeen fadli badan ,  
fadligiisa waxa kamida :

1. Waa habeen camalka la qabtaa uu ka khayr badan yahay midka la qabto kun bilood (yacni 83 sanno iyo 4 bilood) oo habeenkaas uusan ku jirin.
2. Waa habeenkii Quraanka Lawxul-Maxfuudka laga soo dejiyey, lana keenay samada dunida.
3. Waa habeenka Lawxul-maxfuudka laga soo dejijo ee laga soo qaado sannadka waxyaabaha dhacaya, sida wixii dhimanaya, wixii dhalanaya, risiqa iwm, iyadoo loo keenayo oo loo dhiibayo malaa'igta u xilsaaran arintaas.
4. Waa habeen malaa'igta la soo dejijo, iyadoo uu ka mid yahay Malaku Jibriil, habeenkaa Allaah SW ayaa karaameeyey, kitaabkiisa ku xusay. <sup>4</sup>

Ducada habeenkaa la akhristo

---

4 : intan waxan ka xigtay Daryeel maganzing.

## Ducooyinkii la aqbalay.

Habeenkaa qofka haleela ee mawle waafajiyo , waxa mudan inuu ku ducaysto ducadan :-

Caa'isha bintu Abii bakar Alle ha raalli noqdee oo ahayd xaaskii Nebiga ayaa Rasuulka (Cs) ku tidhi : Haddii aan ogaado habeenka uu yahay Laylatul-Qadrigu maxaan ku ducaystaa? Waxa uu ku yidhi : waxad tidhaahdaa :

اللهم إِنَّكَ عَفُوٌ تُحِبُّ الْعَفْوَ فَاعْفُ عَنِي

*“Allaahuma innaka cafuwun , tuxibbu Al-cafwa ,  
facfu cannii” .*



Ducooyinkii la aqbalay.



## Ducooyinka ugu mudan in lagu ducaysto

Qofka muslimka ahi kolkuu ducaysanayo waxa wanaagsan inuu ku ducaysto ducooyin gaara , ducooyinkaas waxa ugu mudan :-

Ducooyinka Qur'aanka ku jira

Ducooyinkii Rasuulka (Cs )

Ducooyinkii dadkii wanaagsanaa

Ducooyin isaga u garaa .

Waxa xusid mudan ; in qofku ku ducaysan karo afkiisa , waayo luqad kasta Allaa abuuray, xataa kuwa qur'aanka ku jira waad af-soomaali garaysan kartaa.



Ducooyinkii la aqbalay.

## Ducooyinkii la aqbalay

Qur'aanka sharafta leh wax aka buuxa ducooyin la aqbalay, ducooyinkaas oo ka ay ku ducaysteen Nebiyedii maamuuska badnaa , waana ducooyinka ay tahay inuu qofku ducaysto , ducooyinkaa waxaynu ka xusi karnaa :-

دعاة سليمان عليه السلام  
رب أوزعني أنأشكر نعمتك  
التي أنعمت علي وعلى والدي  
وأن أعمل صالحاً ترضاه  
وأدخلني برحمتك  
في عبادك الصالحين

دعاة نوح عليه السلام  
رب إني أعوذ بك  
أن أسألك ما ليس لي به علم  
وإلا تغفر لي وترحني  
لأكن من الخاسرين

دعاة شعيب عليه السلام  
وسع ربنا من كل شيء علما  
على الله توكلنا  
ربنا أفتح بيننا وبين قومنا بالحق  
وأنت خير الفاتحين

دعاة أئوب عليه السلام  
رب إني قد مسني الضر  
وأنت أرحم الراحمين

دعاة موسى عليه السلام  
رب اشرح لي صدرني  
ويسر لي أمري  
وأحلل عقدة من لسانني  
يفقهوا قولي

دعاة يونس عليه السلام  
لا إله إلا أنت سبحانك  
إني كنت من الظالمين

دعاة آدم عليه السلام  
ربنا ظلمينا أنفسنا وأن لم  
تغفر لنا وترحمنا لنكون  
من الخاسرين

دعاة إبراهيم عليه السلام  
رب اجعلني مقيم الصلاة  
ومن ذريتي ربنا وتقبل دعاء

دعاة يوسف عليه السلام  
أنت ولي بالدنيا والآخرة  
توفني مسلماً  
وألحقني بالصالحين

Ducooyinkii la aqbalay.

## Ducooyinkii Rasuulka :

Suubaneheenii sharafta badnaa (N.N.K.H.) waxa uu ahaa mid mar walba Alle barya , isagoo dabigiisii hore iyo kiisii dambaba la dhaafay. Ducuuyinku ku ducaysan jiray waxan ka soo qaadan karnaa :-

رَبِّ أَعِنِي وَلَا تُعْنِي عَلَيَّ، وَأَنْصُرِنِي وَلَا تَنْصُرْنِي عَلَيَّ، وَأَمْكِنْ لِي وَلَا تَمْكِنْ عَلَيَّ، وَاهْدِنِي وَيَسِّرِ  
الْهُدَى إِلَيَّ، وَأَنْصُرِنِي عَلَى مَنْ يَعْنِي عَلَيَّ، رَبِّ اجْعَلْنِي لَكَ شَكَّارًا، لَكَ ذَكَرًا، لَكَ رَهَابًا، لَكَ  
مِطْوَاعًا، إِلَيْكَ مُخْبِتًا أَوْاهًا مُنْبِتًا، رَبِّ تَقْبِلْ تَوْبَتِي، وَاغْسِلْ حَوْتَتِي، وَأَجْبِ دَعْوَتِي، وَثَبِّتْ  
حُجَّتِي، وَاهْدِ قَلْبِي، وَسَدِّدْ لِسَانِي، وَاسْلُلْ سَخِيمَةً قَلْبِي .

اللهم أصلح لي ديني الذي هو عصمة أمري، وأصلح لي دنياي التي فيها معاشي، وأصلح لي آخرتي التي فيها معادي، واجعل الحياة زيادة لي في كل خير، واجعل الموت راحة لي من كل شر.

اللَّهُمَّ إِنِّي أَسأَلُكَ مُوجِباتِ رَحْمَتِكَ، وَعَزَائِمَ مَغْفِرَتِكَ، وَالسَّلَامَةَ مِنْ كُلِّ إِثْمٍ، وَالغَنِيمَةَ مِنْ  
كُلِّ بُرٍّ، وَالْفَوْزَ بِالْجَنَّةِ، وَالنَّجَاةَ مِنَ النَّارِ.

اللهم إني أعوذ بك من شر نفسي، ومن شر كل دابة أنت آخذ بناصيتها، إن ربي على صراط مستقيم.

اللهم رحمتك أرجو، فلا تكثني إلى نفسي طرفة عين، وأصلح لي شأني كلّه، لا إله إلا أنت.

اللهم إني أعوذ بك من زوال نعمتك، وتحول عافيتك، وفجاءة نقمتك، وجميع سخطك.

## Ducooyinkii la aqbalay.

اللّهُمَّ أَكْثِرْ مَالِي وَوَلْدِي وَبْلَكَ لِي فِيمَا أُعْطِيْتِنِي.

اللّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ الْعَافِيَةَ فِي الدُّنْيَا وَالْآخِرَةِ.

اللّهُمَّ أَهْمِنِي رِشْدِي، وَأَعْذِنِي مِنْ شَرِّ نَفْسِي.

اللّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنْ جَهْدِ الْبَلَاءِ، وَدَرْكِ الشَّقَاءِ، وَسُوءِ الْقَضَاءِ، وَشَمَاتَةِ الْأَعْدَاءِ.

للّهِ أَحْسَنَ عَاقِبَتَنَا فِي الْأَمْوَارِ كُلِّهَا، وَأَجْرَنَا مِنْ خَزِيِ الدُّنْيَا وَعِذَابِ الْآخِرَةِ.

اللّهُمَّ إِنِّي عَبْدُكَ ابْنُ عَبْدِكَ، ابْنُ أَمْتَكَ، نَاصِيَتِي بِيْدِكَ، ماضِي فِيْ حُكْمِكَ، عَدْلٌ فِيْ قَضَائِكَ. ”

أَسْأَلُكَ بِكُلِّ اسْمٍ هُوَ لَكَ سُمِيتَ بِهِ نَفْسِكَ، أَوْ أَنْزَلْتَهُ فِيْ كِتَابِكَ، أَوْ عَلِمْتَهُ أَحَدًا مِنْ خَلْقِكَ،  
أَوْ اسْتَأْثَرْتَ بِهِ فِيْ عِلْمِ الْغَيْبِ عِنْدَكَ، أَنْ تَجْعَلَ الْقُرْآنَ رِبِيعَ قَلْبِيِّ، وَنُورَ صَدْرِيِّ، وَجَلَاءِ  
حَزْنِيِّ، وَذَهَابَ هَمِّيِّ.

إِلَهُ إِلَّا اللَّهُ الْعَظِيمُ الْحَلِيمُ، لَا إِلَهُ إِلَّا اللَّهُ رَبُّ السَّمَاوَاتِ،  
وَرَبُّ الْأَرْضِ، وَرَبُّ الْعَرْشِ الْكَرِيمِ.

اللّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنْ قَلْبٍ لَا يَخْشَعُ، وَدُعَاءٍ لَا يُسْمَعُ، وَمَنْ نَفْسٍ لَا تُشَبَّعُ، وَمَنْ عِلْمٍ لَا  
يَنْفَعُ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ هُوَلَاءِ الْأَرْبَعِ

اللّهُمَّ إِجْعَلْ أَوْسَعَ رِزْقَكَ عَلَيَّ عِنْدَ كَبِيرِ سِنِّيِّ، وَإِنْقِطَاعَ عَمْرِيِّ

اللّهُمَّ يَا مُصْرِفَ الْقُلُوبِ صَرِفْ قُلُوبَنَا عَلَى طَاعَتِكَ

اللّهُمَّ رَبَّنَا آتَنَا فِي الدُّنْيَا حَسَنَةً وَفِي الْآخِرَةِ حَسَنَةً وَقِنَا عَذَابَ النَّارِ

اللّهُمَّ إِنِّي ظَلَمْتُ نَفْسِي ظُلْمًا كَثِيرًا، وَلَا يَغْفِرُ الذُّنُوبَ إِلَّا أَنْتَ، فَإِنْغِفِرْ لِي مَغْفِرَةً مِنْ عِنْدِكَ  
وَإِرْحَمْنِي، إِنَّكَ أَنْتَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ.

اللّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنْ مُنْكَرَاتِ الْأَخْلَاقِ، وَالْأَعْمَالِ وَالْأَهْوَاءِ

## Ducooyinkii dadkii wanaagsanaa

ducooyinkii dadkii wanaagsanaa waxa kamida :

اللهم نسألك يا غفور يارحمن يارحيم.. أن تفتح لأدعينا أبواب الإجابة..  
يا من اذا سأله المضطرب أجاب.. يا من يقول للشيء كن فيكون.. اللهم لا  
تردنا خائبين.. وآتنا افضل ما يؤتى عبادك الصالحين.

اللهم إني أسألك إيماناً يباشر قلبي، ويقيناً صادقاً حتى أعلم أنه لن يصيبني  
إلا ما كتبته علي، والرضا بما قسمته لي يا ذا الجلال والإكرام.

اللهم إني أسألك صدق التوكل عليك وحسن الظن بك. اللهم اهدني ثم  
اهدني ثم اهدني ثم خذني إليك.

اللهم أحسن خلقي فأحسن خلقي. اللهم اقذف في قلبي رجاءك واقطع  
رجائي عن سواك حتى لا أرجو أحداً غيرك.

اللهم إني أسألك إيماناً دائماً، وأسائلك قلباً خاشعاً، وأسائلك علمًا نافعاً،  
وأسألك يقيناً صادقاً، وأسائلك ديناً قيماً، وأسائلك العافية من كل بلية،  
وأسألك تمام العافية، وأسائلك دوام العافية، وأسائلك الشكر على العافية  
وأسألك الغنى عن الناس.

Ducooyinkii la aqbalay.

### Gaba-gabo :

Ilaahay ayaa mahad leh , mahad u qalanta weynantiisa. Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaato mid Alla barya kii ugu khayrka badnaa; Muxamed.Intaas kooban Ayaan ku soo koobayaan buuggan , waxaan Alle ka baryayaa inuu dabigeenna dhaafo , kii waalidkeena dhaafo , ka musliimiintana dhaafo , shafaacada Nebigana innagu guuleeyo. Waa bil Ramdaan akhriste ,hana naga ilaabin ducadaada wanaagsan , idanka Alle.



Ducooyinkii la aqbalay.

## Buugg kaashi .

القرآن الكريم

تفسير ابن كثير

سنن الترمذى

سنن أبي داود

عجائب الدعاء

جدد ايمانك

عماد الدين ابن كثير

الإمام الترمذى

الإمام أبي داود

خالد بن سليمان الربعي

د.طارق السويدان

Ducooyinkii la aqbalay.



**Ismaaciil Haniye**

**Watepka : 3440058.**

**Ramadaan kariim.**

**4/5/2021.**